

Ogaaw Xuquuqdaada Helitaanka Luqadda

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho gargaar xagga luqadda ah oo kharash la'aan ah si uu uga hadlo daryeelkaaga ama ilmahaaga, iyo xubnaha qoyskaaga hadba sida loogu baahdo. Turjumaanku wuxu si fiican ugu hadla Ingiriisi iyo Somali, wuxuuna tababar ku qaata erayada caafimaadka si loo hubiyo in adiga iyo dhakhtarkaaga iyo shaqaalaha kale ee caafimaadku heshaan macluumaad sax ah. Turjumaanka tababaran wax adiga kula xidhiidha lama wadaagayo cid kale.

Waxaad weydiisan kartaa gargaar turjumaan hufan, xagga waxyaabaha ku qoran afkaaga, inta aad ku sugan tahay isbitaalada, rugta caafimaadka, iyo xafiisyada caafimaadka si ay:

- **Kaala hadlaan dhakhtarada, kalkaalisooyinka, iyo xubnaha kale ee shaqaalaha**
- **Kuugu qabtaan ballamada**
- **Kaala hadlaan biilasha iyo caymiska**

Maxay Adeegyada Luqaddu Muhiim Ugu Yahiiin Daryeelka Caafimaadka

Waa Sharci

Sharciyada Gobolka iyo Maraykanka ayaa u baahan in ay u sinaadaan helitaanka daryeelka dadka u baahan in laga kaalmeeyo fahamka, hadalka iyo akhriska Ingiriisiga, iyo dadka naafada.

Waxay ka gargaartaa bukaanada helitaanka daryeelka saxa ah waqtiga saxa ah

Bukaanada, qoysaska, iyo shaqaalaha caafimaadka dhammaan waxay u baahan yihiin inay awoodaan inay ka wada hadli karaan arrimaha dhibaatooyinka caafimaadka, daryeelka, wixii guriga lagu samaynayo, iyo goorta iyo sida gargaar mar danbe loo heli karo.

Waxay gargaartaa bukaanadu inay ammaan ahaadaan

Daraasado ayaa muujinaya in marka bukaanadu aanay helin adeegyada luqadda, waxa laga yaabaa inay waxyeelo badan ka gaadho qaladaad caafimaad oo ka mid yihiin qaladaad daawayn; in badan u baahdaan daryeelka degdeggaa; iyo guud ahaan la kulmaan dhibaatooyin caafimaad oo culus.

Ka gargaartaa yaraynta kharashka daryeelka caafimaadka

La'aanta adeegyada luqadda, dhakhtaradu ma garanayaan dhibaatada bukaanka, markaas waxa laga yaabaa inay sameyan baaritaano badan oo bukaanada u diraan isbitaalka, xataa markaan looba baahnayn.

Haddii aad dhibaato ku qabto helitaanka adeegyada luqadda, waxaad buuxin kartaa cabasho ku socota Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office of Civil Rights), Xafiiska Gobolka X (Region X Office), ee Waaxda Adeegyada Caafimaadaka iyo Aadanaha (U.S. Department of Health and Human Services): **Telefoonka:** (800) 368-1019, **Faks:** (206) 615-2297, **Tdd:** (800) 537-7697, ama internetka www.hhs.gov/ocr/office/index.html; ama la-xiriir Golaha Xuquuqda Adaanaha Gobolka Washington (Washington State Human Rights Commission) **Iambarka** 1-800-233-3247, **TTY:** 1-800-300-7525, ama tag <http://www.hum.wa.gov/>.



WASCLA

Washington State Coalition for Language Access

www.wascla.org